Tix: MSS/006/25

Agoosto 14 2025,
Muqdisho, Soomaaliya.

# WAR-MURTIYEED

Madasha Samatabixinta Soomaaliyeed oo ka duulaysa

1. Adkaynta midnimada iyo wadajirka dalka, iyo sidii xal loogu heli lahaa khilaafka siyaasadeed ee ka dhashay beddelkii Dastuurka.
2. In meel looga soo wada-jeesto dagaalka kooxaha argagexisada ah ee Al-shabaab iyo Daacish, si loo badbaadiyo jirtaanka qarannimo iyo dowladnimada ee dalkeenna.
3. In dowlad goboleedyada maqan ee Puntland iyo Jubbaland lagu qanciyo in ay qayb ka noqdaan wadahadalka qaran.
4. In heshiis buuxa laga gaaro doorasho toos ah oo daahfuran, heshiis lagu yahay, looguna gogol-xaarayo qof iyo cod, kuna salaysan dastuurkii dadka Soomaaliyeed ku heshiiyeen 2012.

Madashu oo ka barigantaalaysa qodobbada kor ku xusan ayaa wadahal la furtay Madaxweyne Xasan Sheekh. Shan kulan wadaxaajood oo socday muddo bil iyo bar ah oo labada dhinac dhexmaray ayey madashu dalbatay in Madaxweynaha uu ka laabto cutubka afaraad ee dastuurka iyo shuruucdii doorasho ee ka ratibmay, kaasoo dhaawacaya heshiiskii siyaasadeed ee saldhigga u ahaa Jamhuuriyadda Saddexaad ee dalka sida;

- Nidaamka Barlamaaniga ah
- Hannaanka xukun ee Federaalka
- Awood qaybsiga siyaasadeed

- Doorashada afar sanadlaha ah
- Talada geedi-socodka dowlad-dhiska dalka oo wadar-oggol lagu gooyo

Madashu waxay u dhabar adaygtay in wadahallada laga mira dhaliyo, si dalka looga samatabixiyo khilaaf iyo kala qaybsanaan dhaawac ku ah wadajirka iyo midnimada, niyadjabkana ku riday shacabka iyo beesha caalamka, taasoo u adeegaysa cadawga Soomaaliyeed oo ay argagexisadu ugu horreyso.

Nasiib-darro, lama gaarin heshiiskii ay shacabka Soomaaliyeed rajada gelin lahaa, looga badbaadi lahaa khilaafka, loogana mashquuli lahayn dadaalka looga soo horjeedo argagexisada.

Madasha waxaa u aragtaa in uu dalku marayo kala bayr halis ku ah jiritaanka dowladnimada iyo midnimada dalka.

**Haddaba Madashu waxay ku baaqaysaa;**

- ✓ In dib loogu laabto dastuurkii 2012 ee ay bulshada Soomaaliyeed heshiiska ku ahayd ee ku salaysnaa nidaamka Baarlamaaniga ah ee u uku dhisnaa heshiiskii Carta.
- ✓ In 9-ka bil ee ka harsan muddo xileedka Madaxweynaha xal laga gaaro doorasho toos ah oo loo dhanyahay, heshiisna lagu yahay, dalka u hoggaamisa qof iyo cod.
- ✓ In degdeg loo joojiyo colaadda ay Dowladu dalka ka hurrinayso, gaar ahaan Gobolka Gedo.
- ✓ In uu Madaxweynuhu hakiyo arrrimaha dhulka danta guud ee dhalisay xasilooni darrida.

Ugu danbayn; Madashu waxay caddaynaysaa in ay diyaar u tahay wadaxaajood dalka lagu samatabixinayo, iyadoo mudnaanta la siinayo danta guud, midnimada dadka iyo wadajirka ummadda, si taas looga miradhaliyo, Madashu waxay go'aamisay in guddigii wada wadaxaajoodka uu sii wado hawshiisa.

**Dhammaad.**